**Ogeysiis Muhiim ah oo ka socdo**
**Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta Ku Saabsan Daboolista Dawo-Qoristaada Iyo Medicare**
**Oktoobar 2023**

Fadlan si taxadar leh u akhri ogeysiiskan oo dhigo meel aad ka soo heli karto. Ogeysiiskani waxa uu xog kaaga hayaa daboolista caymiska dawada hadda kaaga qoran Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta iyo wax ku saabsan doorashooyinkaaga hoos yimaada daboolista caymiska dawo-qorista ee Medicare. Macluumaadkan ayaa kaa caawin kara in aad go'aansato in aad rabto in aad ku biirto qorshaha daawada Medicare iyo in kale. Haddii aad ka fekereyso in aad ku biirto, waa in aad isu barbardhigtaa caymiskaaga hadda, oo ay ku jiraan kharashka daawooyinka lagu daboolo, iyo caymiska iyo kharashyada qorshayaasha bixiya caymiska dawo-qorista Medicare ee aaggaaga. Macluumaadka ku saabsan halka aad ka heli karto caawimo si aad go'aan uga gaarto waxa ku saabsan caymiska dawada laguu qoray ayaad ka heleysaa dhammaadka ogeysiiskan.

Waxaa jira labo shay oo muhiim ah oo aad u baahan tahay in aad ka ogaato daboolista caymiskaaga hadda iyo daboolista caymiska dawo-qorista ee Medicare:

1. Caymiska dawo-qorista ee Medicare waxaa heli kara qof kasta oo leh Medicare. Waxaad heli kartaa caymiskan haddii aad ku biirto Qorshaha Dawo-qorista Medicare ama aad ku biirto Qorshaha Faa'iidada Medicare (sida HMO ama PPO) kaas oo bixiya daboolista caymiska dawo-qorista. Dhammaan qorshayaasha dawada Medicare waxay bixiyaan ugu yaraan heerka caymiska ee ay dejisay Medicare. Qorshayaasha qaar waxaa kale oo laga yaabaa in ay daboolis dheeraad ah ku bixiyaan marka la bixiyo khidmad sare oo bille ah.

2. Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ayaa go'aamiyay in daboolista caymiska dawo-qorista ee uu bixiyo Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta, celceliska dhammaan ka qaybgalayaasha qorshaha, laga filayo inuu bixiyo ilaa inta uu bixiyo caymiska dawo-qorista Medicare ee caadiga ah waxaana sidaas darteed loo tixgeliyaa Daboolis La isku Hallayn Karo. Maadaama daboolistaada jirta ay tahay Daboolis La isku Hallayn Karo, waxaad sii wadan kartaa daboolistan mana bixinaysid khidmad sare (ganaax) haddii aad goor dambe go'aansato in aad ku biirto qorshaha daawada ee Medicare.

---

**Goorma Ayaad Ku Biiri Kartaa Qorshaha Dawooyinka Medicare?**

Waxaad ku biiri kartaa qorshaha dawada Medicare marka ugu horraysa ee aad uqalanto Medicare iyo sannad kasta laga bilaabo Oktoobar 15keeda ilaa Diseembar 7deeda.

Si kastaba ha noqotee, haddii aad lumiso caymiskaaga dawo-qorista la isku hallayn karo ee hadda, oo adiga aadan qaladka lahayn, waxaad sidoo kale uqalmi doontaa labo (2) bilood oo ah Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah (SEP) si aad ugu biirto qorshaha daawada ee Medicare.

**Maxaa Ku Dhacaya Daboolistaada Hadda Haddii Aad Go'aansato In Aad Ku Biirto Qorshaha Daawada Medicare?**

Haddii aad go'aansato in aad ku biirto qorshaha daawada ee Medicare, daboolistaada hadda ee Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ma saameyn doonto. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad go'aansato in aad ku biirto qorshaha daawada Medicare oo aad iska tuurto daboolista caymiska hadda ee Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta, la soco in adiga iyo kuwa kugu tiirsan aynan awoodi doonin in aad dib u heshaan daboolistan.

**Kabka Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Qorsha**

Sida kor lagu xusay, daboolista caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Qorshaha waxaa loo tixgaliyaa daboolis la isku hallayn karo, sidaas darteed waxaad sii wadi kartaa daboolista caymiskaaga hoos yimaada Qorshaha mana bixin doontid ganaax oo ah qaab khidmad bixin sare ah marka aad ugu dambeyntii iska diiwaangeliso caymiska Qeybta D ee Medicare.

Iyadoo la raacayo shuruudaha gaarka ah iyo xaddidaadaha Sharaxaada Soo Koobidda Qorshaha ee Qorshaha, waxaad guud ahaan yeelan doontaa $5.00 ama 10% oo kharashka aragtida adeegga ah, hadba kan weyn oo aan ka badnayn $20 ee daawooyinka guud ee la tayada ah balse qiimaha jaban iyo kharashka aragtida adeegga oo dhan 20% oo aan ka badnayn $50 ee daawooyinka wata magaca shirkadda. Qorshuhu wuxuu sidoo kale bixiyaa barnaamijka ku dalbashada boostada kaas oo aad ku yeelan doonto kharashka aragtida adeegga oo dhan $10 ama 10%, hadba kii weyn, oo aan ka badnayn $40 iyo kharashka aragtida adeegga oo dhan 20% oo aan ka badnayn $100 ee daawooyinka wata magaca shirkadda.

Ugu dambeyntii, iyadoo lagu salaynayo baahidaada shakhsi ahaaneed ee daawooyinka dhakhtarku qoro, waa in aad go'aamisaa qorshaha (Medicare Qeybta D ama Qorshahan) ee ku siinaya daboolista guud ee ugu fiican.

**Goorma Ayaad Bixin Doontaa Khidmad Sare (Ganaax) Si Aad Ugu Biirto Qorshaha Daawada Medicare?**

Waa in aad sidoo kale ogaataa in haddii aad iska dhaafto ama aad lumiso daboolistaada caymiska hadda ee Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta oo aadan ku biirin qorshaha daawada Medicare 63 maalmood gudahooda kadib marka caymiskaaga hadda dhamaado, waxaa laga yaabaa in aad bixiso khidmad sare (ganaax) si aad goordambe ugu biirto qorshaha daawada Medicare.

Haddii ay dhacdo 63 maalmood oo joogto ah ama ka badan adiga oo aan lahayn daboolista caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro oo la isku hallayn, khidmadahaaga bishii waxaa laga yaabaa in ay kor u kacaan ugu yaraan 1% ee khidmadda ka-faa'iideystaha aasaasiga ah ee Medicare bishii ee bil kasta oo aadan soo haysan daboolistaas. Tusaale ahaan, haddii ay dhacdo sagaal iyo toban bilood oo aadan haysan daboolista caymiska la isku hallayn karo, khidmadahaaga ayaa laga yaabaa in ay si joogto ah ugu yaraan 19% ka sarreeyaan khidmadda ka-faa'iideystaha aasaasiga ah ee Medicare. Waxaa laga yaabaa in aad bixiso khidmad sare (ganaax) ilaa iyo inta aad haysato daboolista caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Medicare. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa in aad sugto ilaa bisha Oktoobar ee soo socota si aad ugu biirto.

**Wixii Macluumaad Dheeraad ah oo Ku Saabsan Ogeysiiskan ama Daboolistaada Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Hadda…**

Kala xiriir qofka hoos ku qoran si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah. **FIIRO GAAR AH:** Waxaad heli doontaa ogeysiiskan sanad walba. Waxaad sidoo kale heli doontaa ka hor muddada xigta ee aad ku biiri karto qorshaha daawada Medicare, iyo haddii uu isbeddelo caymiskan lo marayo Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta. Waxaad sidoo kale codsan kartaa koobiga ogeysiiskan wakhti kasta.

**Wixii Macluumaad Dheeraad ah oo Ku Saabsan Xulashooyinkaaga Hoos Yimaada Daboolistaada Daawooyinka Dhakhtarku Qoro ee Medicare…**

Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan qorshayaasha Medicare ee bixiya daboolista caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ayaa ku jira buug-gacmeedka "Medicare & Adiga". Waxaad boosto ku heli doontaa koobiga buug-gacmeedka sanad walba oo ka socda Medicare. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in si toos ah lagaala soo xiriiro qorshayaasha daawada Medicare.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daboolistaada caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Medicare:

- Booqo www.medicare.gov
- Wac Barnaamijka Caawinta Caymiska Caafimaadka ee Gobolkaaga (ka eeg jeldiga dambe ee koobigaaga buug-gacmeedka "Medicare & Adiga" si aad uga hesho taleefan lambarkooda) si aad u hesho caawimo shaqsiyeysan
- Wac 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha TTY waa in ay wacaan 1-877-486-2048.

Haddii aad leedahay dakhli iyo kheyraad xaddidan, caawimo dheeraad ah oo aad isaga bixiso caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Medicare ayaa la helayaa. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan caawimadan dheeraadka ah, booqo Sooshal Sakuuratiga barta www.socialsecurity.gov, ama ka wac 1-800-772-1213 (TTY 1-800-325-0778).

**Xusuusnow: Hayso ogaysiiskan Daboolista La isku Hallayn Karo. Haddii aad go'aansato in aad ku biirto mid ka mid ah qorshayaasha daawada ee Medicare, waxaa lagaaga baahan karaa in aad bixiso koobiga ogaysiiskan markaad ku biirto si aad u muujiso in aad ilaalisay daboolis caymis la isku hallayn karo iyo in kale iyo, sidaa darteed, haddii lagaaga baahan yahay in aad bixiso khidmad sare (ganaax) iyo in kale.**

| | |
|---|---|
| Taariikhda: | Oktoobar 2023 |
| Magaca Hay'adda/Diraha: | Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha<br>Iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta |
| Goobta-Xiriirka/Xafiiska: | Wilson-McShane Corporation |
| Ciwaanka: | 3001 Metro Drive, Suite 500<br>Minneapolis, MN 55425 |
| Lambarka Taleefanka: | (952) 854-0795 ama (800) 535-6373 |